

## ‘Weerar deegaanka Burdaar’

**17 Rabiicu Thani 1444H (11 Novembar 2022)** – Ciidamada Mujaahidiinta Wilaayada Islaamiga ah ee Hiiraan waxay saakay oo Jimca ah weerar lixaad leh la beegsadeen maleeshiyada Ridada ee dullaanka ku ah Shareecada Islaamka, kaas oo ka dhacay degaanka Burdaar ee hoostaga degmada Baladweyne. Weerarka ayaa si gaar ah waxaa loola beegsaday saldhig ay deganaayeen maleeshiyatka ridada ah ee uu Turkigu tababaray.

Dagaal socday mudda kooban Allaah wuxuu jebiyay cadawgii duullaanka ku ahaa Shareecada Islaamka, waxaana ciidamada Mujaahidiintu gacanta ku dhigeen saldhigii maleeshiyada ridada ee deegaanka Burdaar. Khasaaraha dhimasho ee cadawga soo gaaray waa 31 askari oo lagu dilay weerarka kuwaas oo maydadka qaarkood uu cadawgu goobta kaga cararay. Sidoo kale waxay mujaahidiintu gacanta ku dhigeen hub, saanad milatari iyo dhamaan gaadiidkii ciidan ee xerada yaallay kaas oo tiradiisu ahayd 9 gaari oo iskugu jira nooca ciidamada lagu daabulo iyo gaadiidka Tiknikada loo yaqaano.

Wixii faahfaahin intaas ka badan dib ayaa laga soo gudbin doonaa insha’Allaah.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhamaan dhulalka Muslimiinta ah ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka dheeraadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah ilaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة:193]

﴿ وَاللَّهِ الْعِزَّةُ وَرَسُولُهُ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾